

Waa maxay OHP Open Card?

Markaad haysato OHP Open Card, waxaad heli doontaa dhammaan faa'iidooyinka OHP

OHP Open Card waa hab ay dadka qaarkood ku helaan faa'iidooyinka OHP. Waxaad booqan kartaa dhakhaatiirta, dhakhaatiirta ilkaha iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaad ee qaata Open Card. Dhammaan bixiyeyaasha adeegyada caafimaadku ma aqbalaan OHP Open Card. Waa muhiim inaad weydiiso ka hor intaadan helin daryeel.

Waxaad Open Card ku heli kartaa, tusaale ahaan, haddii aad:

- **Aad haysato Medicare ama caymis caafimaad oo kale**
- **Aad leedahay sababo caafimaad oo halis ah**
- **Ma tahay Hindiga Mareykanka ama Dadka Asalka ah ee Alaska?**

Laga bilaabo **Janaayo 1, 2027**, dadka u qalma OHP iyagoo loo marayo Healthier Oregon iyadoo lagu salaynayo xaaladdooda socdaal waxay faa'iidooyinkooda ku heli doonaan adeegga Open Card sababta oo ah isbeddel ku yimid sharciga federaalka.

Sideen wax badan u baran karaa?

Ma u baahan tahay inaad hesho dhakhtar ama bixiye daryeel oo kale?
Booqo OHPOpenCard.org ama wac 800-562-4620.

Ma tahay xubin ka tirsan barnaamijka Open Card oo ka tirsan Hindida Mareykanka ama dadka asal ahaan ka soo jeeda Alaska? Waxaad caawimo ka heli kartaa daryeelkaaga CareOregon.org ama 888-847-9320.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan Open Card, dheefahaaga OHP, ama biil? Wac Adeegyada Macaamiisha OHP lambarka 800-273-0557.

Ma rabtaa inaad wax ka barato isbeddellada kale ee lagu sameeyay OHP?
Booqo OHP.Oregon.gov/HR1

Qaabab iyo luqado kale: Waxaad ku heli kartaa dukumeentigan luqado kale, far waaweyn, farta indhoolayaasha ama qaab aad doorbidayso oo bilaash ah. La xiriir OHP cinwaanka **Ask.OHP@odhsoha.oregon.gov** ama 800-273-0557 (cod). Dhammaan wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa.

La cusbooneysiiyay Ogosto 7, 2026